

OGAYSIIS XARAASH

Waaxda Kastamada Somaliland waxa ay ku dhawaaqay xaraashkii u horeeyay ee alaabooyinka ee si guud looga sameeyo Kastamada Somaliland, iyada oo la raacayo Habraaca Xaraashka Kastamada ee ay dhaqangalisay Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu.

Alaabooyin lagu fulin doono xaraashka ayaa laga soo diiwaangaliyay bakhaarka alaabada ee Kastamka Gagida Dayuuradaha ee Cigaal (EIA), ku waas oo yaalay mudo ka badan wakhtigii loogu talagalay, sida ku cad Xeer-Nidaamiyaha Xeerka Kastamada Somaliland Lr. 03/2019. Waxaa diiwaanka Xaraashka soo diyaariyay Kastamka Cigaal (EIA), waxaanay u soo gudbiyeen Gudida Qiimaynta Xaraashka ee Xarunta Dhexe ee Kastamada, si ay u go'aamiyaan qaabka xaraashka alaabada iyo nidaamka loo marayo xaraashka alaabada.

Gudidu waxa ay alaabada u kala saareen sadex qaybood/nooc:

Alaabooyin la Go'aamiyay in La burburiyo

- Alaabooyinka la isla gartay in ay khatar ku yihiin badqabka/fayadhawrka bulshada iyo deegaanka, sida dawooyinka dhacay iyo bacaha caaga ah (plastic). Alaabooyinkaas waxaa la isla qaatay in la burburiyo/la gubo.

Alaabooyin la Go'aamiyay in Cid loogu Tabaruco/Cid kale la siiyo

- Qalabka iyo alaabooyinka la xidhiidha Wax-barashada iyo Dhar Dumar oo kooban, waxaa la isla qaatay in loogu deeqo Wasaaradda Wax-barashada Somaliland iyo Dharka dumarka oo loogu talagalay in loogu deeqo Xarunta Dhimirka ee Cisbitaalka Guud ee Magaalada Hargeisa (HGH-Mental Health Department), si loogu qaybiyo dadka xanuusanaya.

Alaabooyinka La Go'aamiyay in La Xaraasho

- Alaabooyinka la go'aamiyay in ay ku haboonyihiin Xaraashka, laguna daray Diiwaanka Xaraashka, Alaabooyinka sumadoodu tahay [WHM/02 /08- 5/ 1931/2020](#), taas oo ay ku cadahay tirsiga alaabada, nooca alaabada iyo qiimaha ugu hooseeya ee xaraashka ee wax lagu iibinayo (qiimaha ugu hooseeya ee la ogolyahay) iyo meesha uu xaraashku ka dhacaayo.

Foomka diiwaanka Xaraashka waxaa laga qaadan karaa Kastamka Gagida Dayuuradaha ee Cigaal (EIA), Xarunta Waaxda Kastamada ee Hargeisa iyo Mareegta xogaha ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland (<http://slmof.org/>).

Kastamadu waxa ay aqbali doonaan codsiga xaraashka tirsiga alaabooyinka "Foomka Codsiga Xaraashka", waxaa laga qaadan karaa Waaxda Daryeelka Macaamiisha ee Xarunta Kastamada Hargeisa iyo Kastamka Gagada Dayuuradaha ee Cigaal. Foomka marka la soo buuxiyo waa in loo soo gudbiyaa isla Kastamka Cigaal Airport iyo

Xarunta Daryeelka ee Xarunta Kastamada inta ka horaysa **12:00 am, Maalinta Khamiista ee 12^{ka} Noofember 2020** (12 November 20120)

Qofka ku guulaysta Bid-ka Xaraashka waxaa la ogaysiindoonaa wiiga/usbuuca ku xiga marka uu guulaysto.

Hadii aad rajaynayso in aad ka qayb-qaadato Xaraashka, fadlan raac Shuruucda iyo Habraacyada Xaraashka ee ku jira mareegta Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda(MoFD website).